DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**Sharci Lr.07 ee August 14, 2012, *Kuna saabsan* Sharciga Siyaasadda Hilibka ee Dawladda Puntland**

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/67/2012 ee 09/08/2012;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda Sharciga Siyaasadda Hilibka ee Puntland u leeyihiin dalka;

**Wuxuu soo saaray**

Sharciga soo socda:

Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Siyaasadda Hilibka ee Puntland.

Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

Qodobka 3-aad

Dhaqangalka sharcigani wuxuu noqonayaa maalinta Madaxweynuhu saxiixo, kadibna lagu saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland, kaas oo laga baahinayo idaacadaha iyo jaraa'idka, ka dib ayaa xeerkani sharci noqonayaa, cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhawro kuna dhaqmo xeerkan.

**Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

8

FAAFINTA                                                                                    RASMIGA

الرسمية                                                                                    الجريدة

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 14-aad. Garowe August 14, 2012**                                                    **Lam.08**

**Faafinta bil walba soo baxda**                                                    جريدة الشهرية

***Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Sharciga Siyaasadda Hilibka ee Dawladda Puntland**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

**Waxba ma leh**

***Sharci Lr 07. ee 14/08/2012, Kuna saabsan*** **Sharciga Siyaasadda Hilibka ee Dawladda Puntland**

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOMALIYA**

**PUNTLAND STATE OF**
**SOMALIA**

**GOLAHA WAKIILADA**

**HOUSE OF REPRESENTATIVES**

***Xafiiska Guddoomiyaha***

***Office of the Speaker***

*Ref:* –XGGW/DPL/ 67 /2012 **Garoowe, Khamiis** Date:- **09/08/2012**

**Ku:- Madaxweynaha DPL**

Ujeeddo:- **Ansixinta Siyaasadda Hilibka ee Dawladda Puntland**

**Guddoommiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DPL qodobkiisa 64-aad |
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DPL qodobkiisa 68-aad |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahida loo qabo Siyaasadda Hilibka |
| MARKUU DHEGAYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

Ansixinta Siyaasadda Hilibka ee Dawladda Puntland

***Allaa Mahad Leh***

***Cabdirashiid Maxamed Xirsi***

***Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.***

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

9

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOMALIYA

PUNTLAND STATE OF

SOMALIA

# Siyaasadda Hilibka ee Dawladda Puntland

## 1. Qodobka 1aad

### 1.1. Warbixinta Guud

Soomaaliya waxay ka mid tahay wadamada dhaqda, dhoofiyana xoolaha kuwa ugu badan adduunka oo dhan. Dhaqaalaha dalkuna intiisa badan wuxuu ku tiirsan yahay dakhliga laga helo xoolaha nool, hilibka iyo haraaga xoolaha sida haragga iwm.

Ka dib markii dawladdii dhexe ee soomaaliya burburtay 1991-dii, waxaa hoos u dhac xoog lihi ku dhacay dhaqaalihii badnaa ee laga heli jirey dhoofka xoolaha iyo haraagooda.

Nasiib wanaag markii la yagleelay dawladda Puntland 1998-dii, waxaa si wanaagsan dib ugu soo noqday dhoofinta xoolaha nool, hilibkooda iyo haraagooda. Waxaa kaloo si aad ah u kordhay isticmaalka hilibka iyo caanaha ee gudaha deegaamada Puntland. Inkastoo aan khayraadkaas sidii ugu habboonayd looga faa'iideysan.

Hadaba, waxaa lagama-maarmaan noqotay in dawladda Puntland oo wasaaradda xannaanada xoolahu wakiil ka tahay, samayso siyaasadda hilibka oo looga gol-leeyahay sidii looga faa'iideysan lahaa xoolaha nool, hilibkooda iyo haraagooda sida ugu habboon. Sidaas awgeed ayaa siyaasadan loo sameeyey.

Ujeedada siyaasadan loo sameeyey waa in la diyaariyo jawi-hagaagsan oo looga faa'iideysan karo khayraadka xoolaha, Allaah inaku manaystay, sida ugu habboon ee looga manaafacaadsan karo dalka gudihiisa iyo suuqyada dibedaba.

### 1.2. Dhibaatooyinka Xalka u baahan.

Sidaan hore u soo sheegnay waxaa jira dhibaatooyin badan oo hortaagan in si habboon looga faa'iideysto khayraadka xoolaha dalka.

Dhibaatooyinkaas waxaa sabab u ah caqabado hor-taagan tayaynta manaafacaadka xoolaha oo u baahan in xal loo helo, waxaana ka mid ah:

1. Caqabadaha wax soo saarka.
2. Caqabado ka haysta dhinaca suuqgeynta.
3. Caqabado haysta hay'adaha ku hawlan xoolaha iyo waxa ka soo baxa.

### 1.3. Caqabadaha Wax soo saarka

Sida la wada ogsoon yahay, Puntland waxay leedahay xoolo aad u farabadan, oo haddii si habboon loo manaafacaadsan lahaa, ku filaan lahaa baahiyaha aasaasiga ah ee bulshada. Hase ahaatee, waxaan marna loo samayn siyaasad iyo qorshe lagu hormarinayo khayraadkaas la inagu manaystay. Waxaana jira caqabado badan oo hortaagan in sidii ugu habboonayd loo manaafacaadsado, waxaana ka mid ah:

1. Habka loo dhaqo xoolaha oo ah mid bidaa'i ah oo aysan suurtogal ahayn in faa'iido wax ku ool ah looga helo.
2. Dalka oo ay ku yar yihiin warshadaha hilibka hagaajiya ee dibedda u dira kuwaasoo waafaqsan halbeegyada caalamiga ah ee la aqoonsan yahay.
3. In aysan jirin kaabayaasha dhaqaalaha dhiirigeliya ee dhoofinta xoolaha iyo hilibka sida dekedaha, garoomada diyaaradaha iyo kawaanada casriga ah.
4. In aanay jirin xarumo lagu kobciyo xoolaha si tayadooda kor loogu qaado.
5. Cudurada iyo cayayaanka waxyeeleeya ama hagaasiya xoolaha.
6. Isgaarsiinta oo deegaannada qaarkood liidata, taasoo hoos u dhigta dadaalada dawladda ee daaweynta iyo tallaalka xoolaha.
7. Waxaa aad u yar kawaannada xoolaha ee gudaha dalka, kuwaasoo aan awoodi karin in xoolaha loogu qalo si waafaqsan nidaamka fayo-dhawrka.

8. Waxaa yar helitaanka biyaha ee xoolaha nool, taasoo hoos u dhigta tayada hilibka xoolaha.
9. Waxaa soo noqnoqda abaaro joogto ah, taasoo khasaarisa hanti badan oo dalku lahaa.
10. Waxaan si wanaagsan looga faa'iideysan dhul-daaqsimeedka iyo deegaanka wanaagasan ee Puntland.
11. Waxaan jirin hab isku dubba-ridan oo looga hortegi karo dhibaatooyinka deegaanka sida boholaha ka dilaaca dooxooyinka.
12. Maalgelinta dhaqaalaha ee lagu sameeyo xoolaha iyo hilibkooda oo aan ku filayn.

### 1.4. Caqabadaha Suuq-geynta

Suuq-geyntu waa waxa keliya ee suurageliya is-bixinta iyo horu-kaca ganacsiga. Haddaba, waxaa jira caqabado suuqgeyneed oo u baahan in xal loo helo sida:

1. Waxaan jirin seylado lagu gado xoolaha oo ku yaal Puntland, kuwaasoo u baahan in la helo seylado heer hoose, dhexe iyo sare.
2. Xogta suuqa oo aan si sahlan loo heli karin, taasoo sababta in xog la'aan darteed hanti badani ku khasaarto.
3. Tayo-xumo iyo halbeeg ilaalin la'aan khusaysa dhinaca wax soo saarka, hagaajinta iyo kaydinta hilibka iyo haraagiisa.
4. In aan la samayn daraasad cilmiyaysan oo ku saabsan tayaynta waxtarka xoolaha.

### 1.5. Caqabado hay'adeed

Caqabadaha ay keentay maqnaanshaha hay'adihii horumarin lahaa ka faa'iideysiga habboon ee xoolaha iyo haraagoodu waxay keentay:

1. In aanay jirin halbeegyo habboon oo lagu horumarinayo wax soo saarka hilibka xoolaha iyo haraagooda.

2. In aanay jirin xeerar cusub, oo la jaan-qaadi kara horumarka degdega ah ee adduunku gaarayo oo la ansixiyey.
3. In aan la dhaqan-gelin ama sidii la rabey loo fulin xeerarkii hore u jirey.

Hadaba dawladda Puntland iyadoo arrimahaas ka duuleysa ayey go'aan ku gaartey in la sameeyo siyaasaddan cusub ee hilibka xoolaha.

## 2. Qodobka 2[aad]

### 2.1. Himillada Siyaasadda

Himilada siyaasadan looga gol-leeyahay waa "In dawladda Puntland soo saarto hilib tayo sare leh oo faya qaba, kaasoo hormuud ka noqda suuqyada caalamiga ah, dakhliga ugu badanna laga helo, deegaankana looga faa'iideysto sida ugu habboon, iyadoo wax walba laga hormarinayo caafimaadka dadka iyo joogteynta halbeegyada caalamiga ah ee fayodhawrka".

### 2.2. Wadiiqada Siyaasadda

Xaqiijinta horumarka warshadaha hilibka, si loo daboolo baahida hilib ee dalka, islamarkaana loo hubiyo caafimaad-qabkiisa, lana kordhiyo dakhliga xoolo-dhaqtada.

### 2.3. Yoolka Siyaasadda

In la horumariyo warshadaha hilibka, lana xaqiijiyo koboca wax soo saarka hilibka iyo in fursad loo helo hilib leh tayo sare, kaasoo ku habboon isticmaalka gudaha dalka iyo suuqyada caalamiga ah, si loo kordhiyo dhoofinta xoolaha iyo dhaqaala-abuurka dadka.

### 2.4. Ujeeddooyinka Siyaasadda

Ujeeddooyinka laga leeyahay siyaasadda hilibku waa :

b. In la horumariyo, lana joogteeyo wax soo saar hilib tayo sare leh, si loo daboolo baahida hilibka ee dalka iyo suuqyada caalamiga ahba.

t. In warshadaha laga caawiyo, laguna hogaamiyo habka ugu wanaagsan ee hilibka loo qalo.

j. In kor loo qaado suuq-geynta hilibka iyo haraagiisa.

## 2.5. Habraaca Siyaasadda

Siyaasadda hilibka ee Puntland waxaa hogaaminaya suuqa-xorta ah, tartanka furan, dhiirigelinta ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo daadejinta maamulka. Sidaa darteed siyaasadda hilibka ee Puntland waxaa saldhig looga dhigay mabaadii'da soo socota:

b. Siyaasadani waxay awoodda saaraysaa kobcinta iyo tayaysiinta aqoonta saamileyda, si ay u kordhiyaan wax soo saarkooda, korna ugu qaadaan tayada hilibka iyo haraagiisa.

t. Siyaasadan waxaa laga filayaa in la joogteeyo, korna loo qaado kaabayaasha dhaqaalaha ee lagamamaarmaanka u ah adeegga hilibka.

x. Siyaasadan waxaa laga filayaa in si wanaagsan loo xannaaneeyo xoolaha, lana hubiyo tayada hilibka suuqa la geynayo.

Kh. Siyaasadani waxay joogteynaysaa horumarinta iyo fududaynta tartanka ganacsiga ee ku saabsan hilibka.

d. In Puntland gaarto halbeegga caalamiga ah ee ka ganacsiga hilibka.

r. Siyaasadani waxay keenaysaa hab-dhaqaaleed ku habboon iyo aasaas sharci oo ay leeyihiin wershedaha hilibku.

## 3. Qodobka 3aad

Istaraatiijiyadda lagu fulinayo siyaasadda, waxaa ka mid ah:

### 3.1. Xoojinta Daneeyayaasha

Siyaasadani waxay xoojinaysaa ka qaybgalka dhammaan qaybaha kala duwan ee ay si toosan ama si dadban u saamaynayso

siyaasadda hilibku sida: xoolo dhaqatada, beeraleyda, kawaanleyda, ganacsatada, golayaasha dawladda dhexe, dawladaha hoose, NGO-yada iyo dadweynaha. Iyadoo la ogaanayo qayb walba iyo muhiimadda ay u leedahay qorshaynta iyo fulinta barnaamijka. Si gaar ah waxaa mudnaan loo siinayaa ka qaybgalka dhammaan daneeyayaasha oo ay ku jiraan xoola-dhaqatada, haweenka iyo dadka taagta-daran ee bulshada ka midka ah.

### 3.2. Ka qayb-galka bulshada

Dawladdu waxay aqoonsan tahay in bulshada rayidka ahi tahay halbowlaha dhaqaalaha iyo ganacsiga dalka. Sidaa darteed, waxay qayb-libaax ka qaadanayaan wax soo saarka, habraaca qalliinka iyo suuq-geynta xoolaha iyo waxyaabaha ka soo baxa.

### 3.3. Tixgelinta doorka haweenka

Iyadoo la tixgelinayo tirada haweenka oo ka badan tan ragga, siyaasadda hilibku waxay xaqiijin doontaa in mudnaan gaar ah la siiyo baahiyaha haweenka marka laga hadlayo qorshayaasha ku saabsan horumarinta xoolaha.

### 3.4. Arrimaha Deegaanka

Horumarinta xoolaha iyo manaafacaadsigoodu wuxuu ku xiran yahay in si habboon loo isticmaalo khayraadka dabiiciga ah. Sidaa darteed, waa in laga hortagaa burburka deegaanka iyo diqowgiisa. Siyaasadani waxay tixgelinaysaa illaalinta deegaanka ka hor inta aan mashruuca la fulin.

### 3.5. Wax soo saar Hilib tayo leh.

Joogteynta wax soo saarku waa furaha qorshaha dheer ee lagu gaari karo helidda hilib iyo harag tayo leh, taasna waxaa lagu wajihi karaa istaraatiijiyad qorshaysan oo ay iska-kaashadaan dhammaan qaybaha ay khusayso sida: xoolo-dhaqatada, khubarada,

cilmibaarayaasha iyo kuwa siyaasadda jaan-gooya. Haddaba si lagu gaaro arrimahaas waxaa loo baahan yahay:

1. In xoolo-dhaqatada lagu dhiirigeliyaa in la heli karo calafka xoolaha xilliyada kala duwan, taasoo lagu gaari karo :

b. Horumarinta, maamulidda iyo kormeerka dhul-daaqsimeedka.

t. Horumartinta daaqa dabiiciga ah iyo in la sameeyo wax soo saarka miraha, lana kordhiyo daaqa dabiiciga.

j. In la isticmaalo haraaga dalagga beeraha.

x. In la dhiirigeliyo kaydinta cawska sida **Hay**-ga iyo **silage**-ka.

Kh. In la sameeyo nidaam qorshaysan oo cuntada xoolaha loo siiyo.

d. In la baahiyo nidaamka quudinta xoolaha.

r. In la xaqiijiyo inay xooluhu heli karaan biyaha ay u baahan yihiin.

s. In la helo habraac wax soo saar hilib oo lagu salaynayo nooca calafka si loo helo neef leh miisaan wanaagsan iyo hilib tayo leh.

Sh. In la dhiirigeliyo qaab lagu kaydin karo hilibka.

Dh. In dhul-daaqsimeedka si wanaagsan loo isticmaalo, iyadoo la raacayo xeerka daaqa dawladda Puntland.

c. In la helo nooca xoolaha wanaagsan iyo hab-raac lagu heli karo oo cilmiyeysan.

In la horumariyo caafimaadka xoolaha iyo wax soo saarkooda, taasoo lagu gaari karo:

b. In la sameeyo qaab-nidaamsan iyo kaabayaal joogteynaya ka illaalinaya cuduradda.

t. In la sameeyo daryeel caafimaad oo gaari kara xoolo-dhaqatada oo dhan.

j. In la helo nidaam la tixraaci karo oo lagu illaalinayo caafimaadka xoolaha.
x. In la sameeyo xirmooyin xooluhu daaqaan xilliyada qaarkood.

### 3.6. Hagaajinta habraaca warshadaha hilibka

In la hagaajiyo, lana tayeeyo hilibka, waxay wax ka taraysaa suuqgeynta hilibka, shaqo-abuurista iyo weliba kor-u-qaadista dakhliga dhammaan dadka xoolaha ka shaqaysta. Taasoo ugu dambaynta, qayb libaax ka qaadanaysa qorshaha dawladda ee ku aaddan dabargoynta gaajada iyo fakhriga. Si taas loo gaaro waa in dawladda oo kaashanaysa ganacsata ay hirgelisaa qodobadan soo socda:

1. In la helo gaadiid lagu qaado hilibka iyo haraagiisa.
2. In la helo kawaanno iyo meelo wax lagu qalo oo nadiif ah.
3. In la dareensiiyo xoolo-dhaqatada, kawaanleyda, warshadaha hilibka iyo dadweynaha hilibka isticmaala, muhiimadda ay leedahay fayaqabka hilibku.
4. In kor loo qaado tayada iyo tirada warshadaha hilibka iyadoo la dhiirigelinayo ka qayb-qaadashada iyo maalgashiga bulshada rayidka ah.
5. In la illaaliyo mabaadii'da caalamiga ah ee wax soo saarka wanaagsan, iyadoo la tixgelinayo ka-feejignaanta khataraha imaan kara iyo xadidaadda baahiyeed ee wax soo saarka suuqu qaadi karo.

### 3.7. Suuqgeynta hilibka iyo haraagiisa

In la horumariyo suuqgeynta hilibka iyo haraagiisa, islamarkaana la uruuriyo xogta suuqa si ay xoolo-dhaqatada uga caawiso la socoshada xaaladaha iibka wax soo saarkooda, taasoo xoolo-dhaqatada iyo dadka xoolaha ka faa'iideysta ka caawin karta inay badeecadooda ku helaan qiimo wanaagsan, wax soo saarkoodana u maamulaan sida ku habboon. Taasna waxaa lagu gaari karaa tallaabooyinka soo socda:

1. In dawladda hoose abuurto ama dhisto seylado ganacsi oo xoolaha u gaar ah, kuwaasoo kala heer sareeya. (heer hoose, dhexe iyo sare).
2. In meelaha wax lagu gawraco, kawaanada iyo dukaannada hilibku ay waafaqaan halbeegga caalamiga ah ee loo dejiyey.
3. In la hormariyo nidaamka xog-uruurinta suuqa.
4. In xeerar iyo habraacyo loo sameeyo suuq-geynta xoolaha nool iyo hilibkooda.
5. In wacyi-gelin loo sameeyo kor-u-qaadista isticmaalka hilibka iyo haraagiisa.
6. In la tababaro xirfadlayaal aqoon u leh baarista hilibka iyo haraagiisa, taasoo waafaqsan halbeegyada caalamiga ah.
7. In la sameeyo shirkado suuq-geeya wax soo saarka xoolaha iyo hilibkooda, kuwaasoo ka kooban xoolo-dhaqato, warshadleyda iyo ganacsato.
8. In la sameeyo iskaashi heer-gobol iyo heer-caalami oo ka kooban qaybaha kala duwan ee ay khusayso sida: warshadleyda hilibka iyo ganacsatada xoolaha.

## 4. Qodobka 4[aad]

### 4.1. Fulinta Siyaasadda hilibka

Dhaqangalka siyaasadda hilibku waa masuuliyad wadareed ay wada leeyihiin dawladda iyo bulshadu, weliba la rabo bulshadu inay hogaamiso.

Doorka dawladdu waa sahlidda iyo isu-keenista daneeyayaasha wax soo saarka hilibka. Wasaaradda xannaanada xooluhu waxay door weyn ka ciyaartaa dejinta siyaasadda hilibka, isu-keenista iyo isku-xirka dhammaan dadka siyaasadu saamaynta ku leedahay.

Waxayna dejisaa qorshaha dawladda ee la xiriira siyaasadda hilibka. Waxay kaloo dejisaa islamarkaasna illaalisaa halbeegyada lagama maarmaanka u ah fayaqabka xoolaha nool iyo hilibkoodaba. Waxay kaloo leedahay doorka maamul ee isku-xirka, kormeeridda, dabagalka,

qiimaynta, talo-siinta, tababaridda iyo kor-u-qaadista aqoonta daneeyayaasha siyaasadan.

### 4.2. Guddiga hawl-wadeenadda horumarinta hilibka

Guddiga xannaanada xooluhu wuxuu ka kooban yahay:

1. Wasaaradda xannaanada xoolaha: oo door hogaamineed leh.
2. Xoolo-dhaqatada
3. Beeraleyda xoolaha calfiya.
4. Warshadaha hilibka hagaajiya
5. Ganacsatada dhoofiya xoolaha iyo hilibka
6. Rugta ganacsiga
7. Ururada aan dawliga ahayn
8. Dawladaha hoose
9. Wasaaradda caafimaadka
10. Hay'adaha dawladda ee xiriirka la leh.

Doorka iyo masuuliyadda dhammaan hay'adaha kor ku xusani ku leeyihiin hilibka waxaa lagu soo saarayaa xeer-gaar ah oo ay wasaaradda xannaanada xooluhu diyaarin doonto.

## 5. Qodobka 5aad

### 5.1. Dhanqalka Siyaasadda

Siyaasadani waxay dhaqan geleysaa marka Golaha Wakiiladdu ansixiyo, Madaxweynuhuna saxiixo, islamarkaasna faafinta rasmiga ee dawladda lagu soo saaro.

**Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**